# Cabasho Qoran ee Xaalada Waxbarasho ee Gaar ah

## Tilmaamta Waalidiinta Caruurta & Dhalinyarada (Da'da 3-21)

Daabacaadani waxay kamid tahay taxane Individuals with Disabilities Education Act, IDEA (Sharciga Waxbarashada Shakhsiyaadka Laxaadka La') ikhtiyaarada xalinta khilaafaadka. Tilmaamaha waalidka ee taxanahan waxaa kamid ah:

Dhaxdhaxaadinta Waxbarashada Gaarka ah ee IDEA
Cabashooyinka Gobolka ee Loo Qoray Waxbarashada Gaarka ah ee IDEA Cabashooyinka Nidaamka Aan Dhamaanin ee Waxbarashada Gaarka ah/Dalabyada Dhagaysiga IDEA
Kulamada Xalinta Khilaafaadka Waxbarashada Gaarka ah ee IDEA

CADRE
Center for Appropriate Dispute Resolution in Special Education

IDEAs that Work
Office of Special Education Programs
U.S. Department of Education

*Daabacaadan waxay sharaxaysaa Cabashooyinka Gobolka ee Qoran guud ahaan Qaybta B ee IDEA. Looguma talo galin inay ka turjunto, waxka badasho, ama badasho wixii nidaam ilaalin ah ama waajib sharciga federalka ama gobolka ah.*

## Waa maxay Cabashada Gobolka Oo Qorani?

Cabashada gobolka ee qoran waxaa loo adeegsadaa in lagula xidhiidho hay'ada shacabka (sida dugsiga ilmahaaga) taas oo aan raacin shuruudihii Sharciga Waxbarashada Dadka Laxaadka La' (IDEA), iyo inaad dalbato baadhitaan lagu sameeyo mushkilada. Cabashadu waxaa dhici karta inay ku saabsan yahay ilmo ama arday, ama koox arday ah. Qof kasta ama hay'ada kasta, oo ay kamid tahay mid ka baxsan gobolka, ayaa xarayn karta cabasho gobol.

- Cabashada gobolka ee qoran waxaa caadiyan loo diraa hay'ada waxbarashada gobolka (state educational agencies, SEA). Nuqul waa in loo diraa hay'ada shacabka isla wakhtiga cabashada la gudbinayo.
- Dhawr tusaalayaal oo kamid ah goorta uu waalidku gudbin karo cabashada qoran ee gobalka:
    - ♦ Waxaad ku qanci wayday go'aanka u qalanka ilmahaaga waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha.
    - ♦ Waxaad aaminsan tahay in dugsigu aanu siinin adeegyada ku jira barnaamijka waxbarashada shakhsi ahaaneed ee ilmahaaga ah (individualized education program, IEP).
- SEA ayaa ka masuul ah inay samayso baadhitaan oo ay soo saarto go'aanka u hogaansanaanta. Cabashooyinka gobolka ee qoran qaar waxaa la xaliyaa iyada oo aan loo baahan in baadhitaan la sameeyo.

**Shuruucda ururka goboleedyada IDEA nidaamkooda xalinta khilaafku uu kala duwan yahay.**

**Waalidiinta iyo xubnaha qoyska waxaa lagu dhiiri geliyaa inay la xidhiidhaan hay'adooda waxbarashada gobolka ama xarunta waalidka wixii macluumaad dheeraad ah.**

Waa inay la socodtaa cabashada gobolka ee qoran macluumaadka qaar ay ku xidhan tahay dhamaystirkeedu, sida:

- Qoraal lagu sheegayo in hay'ada shacabku aanay u hogaansamin shuruudihii IDEA;
- Cadaymo lagu xoojinayo qoraalkaas; iyo
- Saxeexa iyo macluumaadka xidhiidhka qofka ama hay'ada gudbinaysa cabashada.

Hadii cabashadu ku saabsan tahay ilmo gaar ah, waa in macluumaadkan lasoo raaciyaa:

- Magaca ilmaha iyo cinwaanka, ama macluumaadka lagala xidhiidhayo hadii ilmuhu darbi jiif yahay;
- Magaca dugsiga ilmaha;
- Sharaxaada mushkilada, oo ay kamid yihiin cadaymaha la xidhiidha mushkilada; iyo
- Talooyinka sida lagu xalin lahaa mushkilada.

Cabashada nasoo gaadha iyada oo aan wadan macluumaadkii shardiga ahaa meesha ayaa laga saarayaa ama waa lasoo celinayaa, taas oo dib u dhigi karta xalinta xaalada.

## Siday Wax Noqonayaan Kadib Marka Aad Gudbiyo Cabashada Gobolka Oo Qorani?

Aad ayuu dalku ugu kala duwan talaabada xigta marka cabashada qoran ee gobolka la gudbiyo. Guud ahaan:

- SEA ayaa adiga iyo dugsigaba idiin soo diri doona warqad uu ku qoran yahay macluumaad ku saabsan nidaamka xalinta cabashada iyo ikhtiyaarada kale ee lagu xalin karo cabashooyinkaaga, sida dhex dhexaadin.
- Qof ama koox ayay SEA ku qori doontaa kaas oo ka shaqayn doona cabashada.

- Baadhitaan ayaa la samaynayaa, taas oo ay kamid noqon karto booqasho dugsi ama wixii goobo ah ee kale, in naqdin lagu sameeyo waraaqaha, oo waraysiga lala yeesho dadka macluumaadka ka haya wixii cabashada la xidhiidha.
- Go'aanka qoran waxaa lasoo saaraa mudo aan ka badnayn 60 maalmood gudaheed kadib marka uu soo gaadho SEA cabashada qoran ee gobolku, iyada oo mudo kordhin lagu sameeyo moojee.

## Maxaa Kamid ah Go'aanada Cabashada Gobolka Oo Qorani ?

SEA waa inuu soo saaraa go'aanka oo qoraal ah oo uu ku socodsiinayo cid kasta oo cabashada lagu sheegey. Waxaa kamid ah cadaymaha iyo waxyaabaha kasoo baxay iyo liiska sababaha keeney go'aanka kama danbaysta ah. Go'aanka waa in sidoo kale uu kamid noqdaa wixii talaabooyin ah ee loo baahan yahay in lagaga jawaabo baahiyaha ilmaha ama kooxda caruurta ah ee cabashadu ku saabsan tahay.

## Suaalo Badanaa La Iska Cabashada Gobolka Ee Qoran

### *Ma waxaa jira foom gaar ah oo ay tahay inaan isticmaalo?*

Maya. SEA-gaagu waa in uu foomka cabashada gobolka ee qoran kuu diyaariyaa laakiin khasab maaha inaad isticmaashaayi. Foomka aad daalacanayso iyo inaad aragto macluumaadka waxa lagaaga baahan yahay waxay kaa caawinaysaa inaad isku duba dirato fikirkaaga kahor inta aanad cabashada qorin.

### *Ma jirtaa wax kale oo ay tahay inaad ka ogaado gudbinta cabashada gobolka ee qoran?*

Xaalada aad kaga waramayso cabashadaada gobolka ee qorani waa inayna dhici wax ka badan hal mar sanadkii lasoo dhaagay, iyada oo gobolka mudo dheer ku siiyay moojee. Waxaa badanaa waxtar leh in lagu daro macluumaadka iyo nuqulada cadaymaha (sida IEP, waraaqaha, qoraalada, iyo warbixinaya) xoojinaya doodaada in hay'ada shacabku ayna raacin shuruudihii IDEA.

### *Dhex dhexaadintu ma la heli karaa marka aan gudbinayo cabashada gobolka ee qoran?*

Haa. Dhex dhexaadintu waa ikhtiyaar la heli karo oo lagu xalin karo mushkiladaha lagu sheegey cabashada gobolka ee qoran, waxayna noqon kartaa mid ka dhakhso badan oo ah dariiq toos ah oo lagu xalin karo xaaladaha ku saabsan arday gaar ah.

*Mudo intee le'eg ayay qaadanaysaa in la xaliyo cabashadayda ama lagu helo go'aan?*

Cabashadaada gobolka ee qoran waa in la xaliyaa iyada oo la adeegsanayo shardiga 60-ka maalmood. Adiga iyo hay'ada shacabka waxaad ku heshiin kartaan qoraan ahaan in la kordhiyo wakhtiga cabashada si aad uga qayb geli karto dhex dhexaadinta, ama SEA ayaa mudo kordhin samayn kara isaga oo eegaya xaalado gaar ah.

*Siday wax noqonayaan hadii aad doono inaan macluumaad dheeraad ah bixiyo kadib marka aan xareeyay cabashada gobolka ee qoran?*

Waa in lagu siiyo fursad aad ku keeni karto macluumaad dheeraad ah oo la xidhiidha cabashadaada, iyada oo af ah ama qoraal ah. Maxaa shay aan hore u dhicin in qof uu la xidhiidho dadka ku lugta leh, oo adigu aad kamid tahay, si macluumaadka loo baahan yahay ee lagu xalin karo mushkilad lagu sheegey cabashadaada usoo uruuriyo.

*Cabasho gobolka oo qoran maka gudbin karaa wax marka hore go'aan lagaga gaadhay dhagaysiga nidaamka socda?*

Haa. Laakiin waa inaad ogaataa in sarkaalka dhagaysiga nidaamka socdaa uu horeba usoo saaray go'aankiisa, xogta isku midka ah iyo dadka ku lugta leh, go'aanka saraalka dhagaysigu waa kii ugu danbeeyay iyada oo ambiil laga qaato moojee.

*Siday wax noqonayaan hadii aad doonayo inaan ka noqdo cabashada?*

Waxaad ka noqon kartaa cabashadaada gobolka ee qoran wakhtiga aad dooto kahor inta aanay xaalad go'aan kasoo saarin SEA.

*Siday wax noqonayaan marka go'aanka laga gaadho xaalada?*

Hadii SEA ay ogaato in hay'ada shacabku ayna raacin shuruudihii IDEA, waxay ka dalban kartaa hay'ada shacabka ah inay qaado talaabin gaar ah. SEA waa inay xaqiijiyaa in talaabada loo qaado si loogu xaliyo mushkilada la sheegey. Waalidiintu waxay la xidhiidhi karaan SEA hadii ay u arkaan inayna taasi dhicin.

*Ambiil maka qaadan karaa go'aanka SEA?*

Inkasta oo IDEA aanu dhigaynin in gobolka nidaam ambiil ah ka bixiyo go'aanka cabashada gobolka ee qoran, waxaad kala hadashaa SEA hadii ay jiraan ikhtitaaro ambiil ahi.

*Ma inaan looyar ama qof dadka u ololeeya qabsadaa si aan u gudbiyo cabashada gobolka ee qoran?*

Maya, lagaagama baahna inaad looyar ama qof dadka u ololeeyo qabsato si aad u xarayso cabasho gobolka ee qoran. Kahor inta

aanad xaraynin cabashada, waxaa fiican inaad kala sheekeysato cid garanaysa nidaamka, sida xubin shaqaalaha xarunta waalidka ah.

### *Siday wax noqonayaan hadii aad gudbiyo cabasho gobolka oo qoran oo aan sidoo kale dalbato dhagaysiga nidaamka socda isla markaas?*

Waxay ku xidhan tahay mushkilada midkiiba. Hadii mushkiladu isku mid tahay labadaba, waxaa dib loo dhigayaa nidaamka xalinta khilaafka cabashada gobolka ee qoran ilaa inta uu ay soo baxayaan go'aanada dhagaysiga nidaamka socda ee sarkaalka dhagaysigu.

Hadii sarkaalka dhagaysigu nidaamka socdaa uu mushkiladan kusoo daro go'aanka, SEA kasoo saari mayso go'aan kale isla mushkiladaas. Hadii sarkaala dhagaysiga nidaamka socdaa aanu kusoo darin go'aankiisa mushkiladan, SEA waa inay bilawdaa ama halkii kasii wadaa nidaamka xalinta khilaafka cabasho gobolka ee qoran.

Wixii mushkilad ah ee lagu sheegey cabasho gobolka ee qoran waxaa waajib ah in lagu xaliyo dhagaysiga nidaamka socda halbeegii 60-ka maalmood, iyada oo SEA samayso mudo kordhin moojee.

## Waxyaabaha La Isla Eego Cabashada Gobolka ee Qoran

- Kani waa ikhtiyaarka xalinta khilaafka IDEA ee kaliya ee uu heli karo qof kastaa ama hay'ad kastaayi, oo ay kamid yihiin dadka aan wax xidhiidh ah la lahayn ilmaha ama ardayda ay ku saabsan tahay cabashadu.
- Natiijada go'aanka kama danbaysta ah ee cabasho gobolka ee qoran waa in kamid noqotaa talaabooyin loo baahan yahay in lagaga jawaabo baahiyaha ilmaha ama kooxda caruurta ah ee cabashadu ku saabsan tahay.

**Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xalinta khilaafka waxbarashada gaarka ah iyo ikhtiyaarada xalinta khilaafka waxaa ka heleysaa IDEA, booqo Websaytka CADRE: cadreworks.org**

## Isha Macluumaadka Muhiimka ah

Liiska wakhtigan ee dhamaan xarumaha waalidka ee dalka oo dhan waxaa laga heli karaa Xarunta Macluumaadka Waalidka iyo Khayraadka (Center for Parent Information and Resources, CPIR): parentcenterhub.org/find-your-center ama la hadal (973) 642-8100

Xarunta Xalinta Khilaafka Munaasabka ah ee Waxbarashada Gaarka ah (Center for Appropriate Dispute Resolution in Special Education, CADRE) waa xarun kaalmo farsamo oo qaran oo qalin khilaafka ah: cadreworks.org ama la hadal (973) 642-8100

Macluumaadka ku saabsan Sharciga Waxbarshada Shakhsiga Laxaadka La' (IDEA) waxaa laga heli karaa onlayn ahaan: https://sites.ed.gov/idea/

## Fiiro

## Hel Macluumaadka Lagala Xidhiidhayo Xarunta Waalidka Deegaankaaga:

**Region 1 Parent TA Center**
NJ Statewide Parent Advocacy Network
35 Halsey St., 4th Floor
Newark, NJ 07102
Taleefan: (973) 642-8100
Faakis: (973) 642-8080
Websayt: spanadvocacy.org

**Region 2 Parent TA Center**
Exceptional Children's Assistance Center
907 Barra Row, Suites 102/103
Davidson, NC 28036
Taleefan: (704) 892-1321
Faakis: (704) 892-5028
Websayt: ecac-parentcenter.org

**Region 3 Parent TA Center**
Parent to Parent of Georgia
3070 Presidential Pkwy, Suite 130
Atlanta, GA 30340
Taleefan: (800) 229-2038
Faakis: (770) 458-4091
Websayt: p2pga.org

**Region 4 Parent TA Center**
WI FACETS
600 W. Virginia St., Ste. 501
Milwaukee, WI 53204
Taleefan: (877) 374-0511
Faakis: (414) 374-4655
Websayt: wifacets.org

**Region 5 Parent TA Center**
PEAK Parent Center
611 N. Weber, Suite 200
Colorado Springs, CO 80903
Taleefan: (800) 284-0251
Faakis: (719) 931-9452
Websayt: region5ptac.org

**Region 6 Parent TA Center**
Matrix Parent Network & Resource Center
94 Galli Drive, Suite C
Milwaukee, WI 94949
Taleefan: (415) 884-3535
Faakis: (415) 884-3555
Websayt: matrixparents.org

**Center for Parent Information and Resources (CPIR)**
35 Halsey St., 4th Floor
Newark, NJ 07102
Taleefan: (973) 642-8100 Faakis: (973) 642-8080
Websayt: parentcenterhub.org

## Xarunta Waalidka Deegaankaaga:

ADRE waxay waraaqa u diyaarisaa si waafaqsan xeerka Waaxda Waxbarashada Maraykanka, Heshiika Xafiiska Isku Duwida Baraamijyada Waxbarashada Gaarka ah Lam. H326D080001. Tina Diamond, oo haysata shahaadada Ph.D., waxey eheyd sargaalka mashruuca. Afkaarta halkaan lagu shaaciyay mamathalayaan go'aanka Waaxda Waxbarashada ama TSharciyadeeda. Majirto ogolaansho guud ooy bixisay Waaxda Waxbarashada ee Mareykanka oo ku saabsan wax soo saar wuxuu ka ahaado, adeeg, ama ganacsi lagu xusay daabacaaddaan ama lagu ogolaado gabagaba ahaan. Waxsoo saarkaan waxey kujirtaa bandhigga bulshada. Ogolaanshaha lagu soo saaraaya guud ahaan ama qeyb ka mid ah waa laogolaaday. Inkastoo ogolaansho dib loogu daabaco aan loo baahneyn, waxa lasoo qaadanaayo waa inuu ahaado: CADRE (2014). Cabasho Gobolka ee Qoran ee Waxbarashada Gaarka ah ee IDEA, Eugene, Oregon, CADRE. Daabacaada waxaa sidoo kale kamid ah linkiyo iyo Cinwaano Websayto (URLs) ay sameeyeen oo ay gacantana ku hayaan hay'ada madax banaan oo loogu soo geliyay si ay akhristayaashu u heli karaan. Waaxdu kama masuul ah saxnimada macluumaadkan. Taariikhda Daabacaada: Janaayo 2014 .